



Australian Government

## COVID-19 VACCINATION

# Macluumaadka AstraZeneca

### Tallaalka AstraZeneca

Waxaa jira xiriir u dhaxeeya tallaalka AstraZeneca iyo xaalad aad dhif u ah, oo ku lug leh xinjirowga dhiiga iyo heerarka dhiigga platelet oo yaraada. Xaaladan waxaa loogu yeero oo loogu yeero Thrombosis leh thrombocytopenia syndrome (TTS).

Tallaalka COVID-19 waxaa lagula talinayaa dhammaan dadka waaweyn. Tallaalka Pfizer waa tallaalka loo doorbidayaalo COVID-19 ka dadka waaweyn ee ka yar 60 sanno. Si kastaba ha ahaatee, dadka waaweyn ee ka yar da'da ah 60 sanno waxaa laga yaabaa inay weli doortaan inay helaan tallaalka AstraZeneca. La hadal dhakhtarkaaga si uu kaaga caawiyo inaad go'aan qaadato.

Tallaalka AstraZeneca waxaa la siin doonaa dadka jira 60 sanno iyo ka weyn.

### Waa maxay Thrombosis leh thrombocytopenia syndrome (oo loo yaqaan TTS)?

Thrombosis micnihiisu waa xinjirow dhiig.

Thrombocytopenia micnihiisu waa heerarka means low blood platelet levels.

TTS dhif u tahay, waxyeelada ka iman kartaa tallaalka AstraZeneca. Haddii ay dhacdo waxay noqon kartaa mid khatar ah, oo sababta naafonimo ama dhimasho. TTS waxay sababtaa xinjiroyga dhiiga, oo ku iman kara qaybo kala duwan oo jirka ah. Waxay sidoo kale sababi kartaa heerarka dhiiga platelet oo yaraada, oo horseedi kara dhiigitaan. Ma jiraan wax xiriir ah oo u dhaxeeya tallaalka Pfizer iyo TTS.

### Goorma ayey dhacdaaTTS?

KiisaskaTTS laga soo warbixiyey waxay dhacaan inta u dhaxeysa 4 ilaa 42 maalmood tallaalka ka dib, badanaa qadarka ugu horeeya ee tallaalka AstraZeneca.

### Caaddi ahaan intee ayey le'eg tahay TTS?

TTS dhif. Waxaa hadda lagu qiyaasayaa inay saameeyso qiyaastii 1-2 qof 100,000 ee qof ee qaata tallaalka AstraZeneca COVID-19. Lakin kuwa ka hooseeya da'da 60 ka sanno, heerka waxaa lagu qiyaasayaa inuu ka sareeyo 2-3 dii qof 100,000 qofba. Qiyaasahan waa la cusbooneysiin doonaa isla marka macluumaad intaas ka badani la heli karo.

### Miyey jiraan kooxo khatarta ay ugu jiraanTTS ay ka sii badan tahay?

TTS waxay u muuqataa inay ku badan tahay dadka dhalinyarada waaweyn, inkastoo lagu soo sheegay qaar ka mid ah dadka waaweyn. Ma garaneyno haddii ay jireen xaalado caafimaad oo

hore u sii jiray oo laga yaabo inay ka qaybqaadanayaan xinjirowga dhiiga. Cilmi baarayaashu ayaa baadhaya tan.

### **Waa maxay astaamaha TTS?**

TTS waxaa laga yaabaa inay sababaan qaar ka mid ah astaamahan soo socda:

- Madax xannuun daran oo joogta ah oo:
  - yimaada ugu yaraan 2 maalmood *ka dib* tallaalka
  - daawada xannuun jebiyaha ah yarina waxba kama tarto
  - waxaa laga yaabaa inuu daran yahay marka la jiifo
- matag iyo lalabo
- si cad wax u arkid la'aan
- hadalida oo adkaada
- hurdeysan
- suuxitaan
- neef qabatin
- xabad xannuun
- lugtaada oo ku bararta
- calool xannuun joogta ah
- dhibco dhiig oo yar maqaarka hoostiisa oo ka fog goobtii cirbada.

Haddii adiga ama qof kale ay ku dhacdo wax ka mid ah waxyeeladaan daran ka dib markaad qaadato tallaalka COVID-19, waa inaad si toos ah u wacdaa 000.

### **Faa'iidooyinka tallaalka AstraZeneca miyey ka badan yihiin khataraha?**

Haa. Faa'iidooyinka tallaalku way ka badan yihiin khatarta, khaas ahaan dadka waa weyn ee khatarta ka badan dadka kale ugu jira inay aad ugu xannuunsadaan COVID-19.

### **Ka waran haddii aad ka yar tahay 60 oo lagu ballamiyo inaad qaadato qadarkii ugu horeeyey ee AstraZeneca?**

Haddii lagu ballamiyey qaadashada qadarka ugu horeeya ee tallaalka AstraZeneca oo aad ka yar tahay da'da ah 60 sanno, la hadal dhakhtarkaaga. Waxay kaa caawin doonaan inaad qaadato tallaalka iyo in kale.

### **Ka waran haddii aad qaadatay tallaalkii koowaad ee AstraZeneca oo ay tahay inaad qaadato kaagii labaad?**

Dhammaan kiisaska la soo sheegay ee TTS waxay dhaceen ka dib tallaalka koowaad ee AstraZeneca COVID-19. Haddii aadan yeelan waxyeelo daran ka dib tallaalkaagii koowaad ee AstraZeneca, waad ku kalsoonaan kartaa qaadashada tallaalka labaad, xitaa haddii aad ka yar tahay 60.

### **Tallaalka AstraZeneca ma u amaanbaa dadka hadda ka hor uu ku dhacay xinjirowga dhiiga?**

Haddii uu kugu dhacay noocyo kale oo ah xinjirowga dhiiga wakhti hore, ama aad khatar ugu jirto xinjirowga dhiiga, weli waad qaadatay kartaa tallaalka AstraZeneca. Ma jirto wax caddeyn ah

oo sheegaysa in xinjirowgii dhiiga ee hore uu kordhinayo khatarta TTS ka dib qaadashada tallaalka AstraZeneca.

### **Wixii macluumaad dheeraad ah**

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan tallaalka AstraZeneca, la hadal dhakhtarkaaga, ama [www.health.gov.au/covid19-vaccines-languages](http://www.health.gov.au/covid19-vaccines-languages), ama ka wac khadka caawimaada Coronavirus Qaranka 1800 020 080. Wixii ah adeegyada turjumaada afka iyo qoraalka, wac, 131 450.